

Waxaad saameyn ku yeelan kartaa nolol maalmeedkaaga – fadlan codee doorashada golaha fulinta ee heer gobol!

Bisha sibtambar 11-keeda 2022 waxaa qabsoomi doona doorashada golaha fulinta ee heer ee gobolka Galbeedka Göteland (Västra Götaland).

Doorashada golaha fulinta ee heer gobol waxaa ay saamey ku yeelan doontaa hawlaha ay uu qabto gobolku, maadaa uu xakumo go'aanada ay gaadhaan siyaasiyiinta heer gobol ee uu shacabku soo doorto. Doorashada golaha fulinta ee heer gobol waxaa ay isku mar qabsoomi doontaa doorashada golaha shacabka ee heer qaran iyo tan golaha fulinta ee heer degmo.

Maxey ku saabsantahay doorashada golaha fulinta ee heer gobol?

Doorasha golaha fulinta ee gobolka galbeedka Göteland (Västra Götaland) waxaa ay ku saabsantahay waxyaabo inta badan saameyn ku leh adiga iyo nolol maalmeedkaagaba. Waxaa tusaale ahaan ka mid ah marka aad ka hesho daryeel caafimaad isbitaalada, rugaha daryeelka caafimadka ama rugaha daryeelka caafimaadka ee ilkaha. Ama gadiidka daweynaha ee aad ku safarto sida basaska, tareenada mara magaalada dhexdeeda ama tareenada lagu safro. Xitaa mararka aad booqaneyso beerta Botaniska ee Göteborg (Göteborgs Botaniska trädgård), Golaha murida iyo madadaalada ee Göteborg (GöteborgsOperan) iyo matxafyo badan oo ku yaalaa Galbeedka Göteland (Västra Götaland). Kuwani waa qaybaha kala duwan ee uu golaha fulinta oo gobolka Galbeedka Göteland ka yahay masuulka. Qaybaha ay ka midka yihiin daryeelka caafimaadka, gaadiidka dadweynaha, hidaha iyo dhaqanka, ganacsiga iyo horumarinta, bey'ada, xuquuqda aadanaha iyo caafimaadka bulshada. Kuwaas iyo kuwo kale oo badan oo ka tirsan gobolka galbeedka Göteland (Västra Götalandsregionen) waxaa ka shaqeeya 55 000 oo shaqaale ah. Waxaana meheradahaas xakuma qiyaastii 1100 siyaasiyiin ah, kuwaas oo adiga iyo dadka kale ee ku nool Galbeedka Göteland aad ka qayb qaadan kartaan in aad soo doorataan.

Waa maxey saameynta aad ku yeelan karto?

Sida aad u codeyso doorashada heer gobol waxaa ay saameyn ku yeelan doontaa cida qabaneysa talada gobolka galbeedka Göteland (Västra Götalandsregionen) iyo sida loo maamulayo iyo waxa lagu isticmaali doono lacagta cashuurta ee aad bixiso. Waxaa aad codkaaga siin doontaa xisbiga iyo siyaasiyiinta aad u aragto in ay ku haboonyihiin in ay maamulaan hawlaha gobolka Galbeedka Göteland (Västra Götalandsregionens) afarta sanno ee soo socota. Xisbiyada hela codadka ugu badan waxey sidoo kale ay heli doonaan tirada kuraasta ugu badan golaha fulinta, kaas oo ah hay'ada ugu sareysa ee maamusha gobolka Galbeedka Göteland (Västra Götalandsregionens). Golaha fulinta ee heer gobol waxaa uu gaadhaa go'aanada guud ee tusaale ahaan ku saabsan arimaha cashuuraha, miisaaniyada iyo siyaabaha loo horumarinayo meheradaha kala duwan.

Yaa codeyn kara doorashada heer gobol?

- Qofka buuxiya 18 sanno jir ugu danbeyn maalinta cod bixinta isla markaana degen kuna jira diiwaanka dadweynaha ee gobolka

Waxaa waliba intaas sii dheer;

- In aad haysato dhalashada wadanka Iswiidhen, wadamada kale ee EU-da Island iyo Noorwey.
- Ama aad haysato dhalashada wadan kale isla markaana ku jira diiwaanka dadweynaha ee wadanka Iswiidhen saddex sanno oo xidhiidh ah ka hor maalinta cod bixinta.

Macluumaad dheeri ah waxaa aad ka heli kartaa www.vgregion.se/regionval

